



Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- haduu hindhisayo gacantiisa ama maradiisa ayuu saari jiray afkiisa oo ku yarayn jiray codkiisa

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- haduu hindhisayo gacantiisa ama maradiisa ayuu saari jiray afkiisa oo ku yarayn jiray codkiisa.

[Xadiis Saxiix ah] [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At-Tirmidi, Iyo Axmed]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ahaa haduu hindhisayo: marka 1aad: gacantiisa ama maradiisa ayuu afka saari jiray, si aanu uga soo bixin afkiisa ama sankiisa wax dadka la fadhiya dhiba. Marka 2aad: codkiisa ayuu hoos u dhigi jiray oo kor uma qaadi. jirin.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3317>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

